PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

# Macluumaad Muhiim ah oo ku Saabsan Waxbarashada Guryaha Lagu Qaadanayo Waqtiga Kala Guurka ah

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Sidaan xalay idinla wadaagnay, korodhka degdeg ah ee xanuunka COVID-19 dadka u soo dhacay noociisa cusub ee Omicron wuxuu sababay kor u kaca maqnaashaha ardayda iyo shaqaalaha dugsiyadeena oo dhan todobaadkani.

Korodhkan maqnaasha waxay culays ku sii kordhisay awoodeenii awal horeba dhibtu ka jirtay, marka la eego tirada macallimiinta bedesha macallimiinta marka ay maqan yihiin iyo shaqaalaha xarunta dhexe ee buuxin kara boosaaska soo bannaan.  Kooxdan shaqaalaha ah waxaa sidoo kale saameeyey maqnaanshahooda xanuunka COVID-19. Awooda aan si buuxda oo nabadgelyo leh aan kaga shaqeyneynaa dugsiyadeena waxay fure u tahay inay keento go'aanka adag ee sida ku meel gaarka ah u qaadanay in afarta dugsi saree labo ka mid ah ee dugsiyadeena, halkaasi oo dadka xanuunka u soo dhacay COVID uu aad u sareeyo, ay waxbarashadoodii ku qaataan guryaha

**Waxaan rabnaa inaan warkayaga si cad idiinku cadeyno: yoolkayagu waa in ay dhismayaasha dugsiyadeenu furnaadaan iyada oo da' yarteena ay ku hareereysan yihiin macallimiin macallimiin daryeelaya sidoo kalena siinaya addeegyadii ay u baahnaayeen- ilaa iyo inta ay addeegyadani ku siin karaan iyaga oo badqaba.**

Sidii aan xalay idinla wadaagnay, hoggaamiyaasha dugsiyada degmadu waxay si joogta ah ula kulmaan madaxda caafimaadka deegaanka si ay isha ugu hayaan xaalada COVID-19, iyo iyada oo aan si dhow u ururineyno xogta aan ku go'aan qaadaneyno ee saameynta shaqaalaha dugsiyada ee COVIDA, waxaa suurtagal ah inaan qaadano go'aan qadhaadh iyada oo si ku meel gaar ah loogu guurayo in waxbarashada guryaha lagu qaato.  Waxaa muhiim ah in aad ka war haysaan in kor u kaca tirada xanuunka COVID ee gobolkeena iyo dib u dhaca hadda ee go'aaminta shaqaalaha ama ardayda u baahan inay iskaliyeeyaan ama iskaarintimeeyaan; daaqadeena COVID-19 waa ay sii socon doontaa iyada oo mar walba la cusbooneysiinayo  marka la helo macluumaad cusub oo soo kordhay.

Haddii ay timaado xaalada bulshada dugsigiinu inay u guurto si ku meel gaar ah inay ardaydu waxbarashada ku qaataan guryaha, waxaan halkan kuugu soo gudbineynaa wixii aad u baahnayd inaan ogaato:

**Jadwalada Fasalada iyo Agabyada Waxbarashada**

Haddii ay timaado xaalada u guuritaan sida ku meel gaarka ardaydu waxbarashada guryaha ku qaadanayaan, maamulayaasha, iyo macallimiintu waxay la soo xiriiri doonaa ardayda iyo waalidiinta si toosa iyaga oo siinaya wixii macluumaad dheeraad ah  ee ku saabsan jadwalada maalinlaha ah, waxbarashada iyo hawlaha manhajka ee dheeraadka ah. Haddana si ardayda iyo waalidiinta looga siiyo

dareen sida uu u ekaan karto waa lagama maarmaan, fadlan waxaad fiirisaan tilmaamaha hagaha. Tilmaamaha iyo hagaha waa la sii wadi doonaa in lagu soo kordhiyo wixii cusub korna loo qaado, sidaas darteed fadlan isha ku hay dugsiga- iyo macallinka- wixii waxbarasho gaar ah ee uu u baahan yahay dugsigaagu marka ay u guurayaan sida ku meel gaarka waxbarashada guryaha ardaydu ku qaadanayaan:

*Maalinta 1: Maalinta Guuritaanka*
Marka aad hesho wargalinta in dugsiga ardaygaagu ay si ku meel gaar ah ugu guurayaan inay waxbarashada ku qaataan guryaha, fadlan waxaad ogaataa in maalinta ugu horeysa dhammaanteed ee wargalinta, ardaydu waxay heli doonaa sida casharada loo qaadanayo) ee loo soo galinayo hababka waxbarashada loogu bixinayo( Canvas ama SeeSaw) sidaas darteed macallimiintu waxay qorsheyn karaan kala guurka waxbarashada guryaha ay ardaydu ku qaadan doonaan. Dugsiyadu waxay diyaarin doonaan shaqaale ardayda iyo qoysaska caawiya sidii ay u heli lahaayeen teknoolajiga iyo agabyada dijitalka ah.
*Waxbarashada Waqtiga Hore(PK) Barashada Hore:*
Macallimiinta Waxbarashada Xilliga hore waxay kula kulmi doonaan ardayda si toos ah muuq-baahiyaha subaxii iyaga oo koox kooban ah si ay waxbarashada u siiyaan. Qoysaska ay heli doonaan inay galaan Shabakadayada Barashada Fogaan Aragga PK( PK Remote Learning website), taasi oo loogu talogalay hawlo ku haboon caruurta da'da 3 sanno ilaa 5 sanno inay waxbarashadooda ku qaataan guryaha inta lagu gudo jiro xiritaanka ay dugsiyada loo xiray COVID dartiis. Macallinka ardaygaaga ayaa kula soo xiriir doona si uu kuu siiyo wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan jadwalka maalinlaha ah iyo hawlaha barashada.

*Fasalada K-5:*
Macallimiintu waxay kula kulmi doonaa si wada jir ah. Macallimiintu waxay siin doonaa fasalka oo dhan iyo koox kooban waxbarashadooda, sidoo kale waxay diyaarin doonaan inay si madax bannaan ay ardaydu u shaqeeyaan. Ardaygaaga macallinkiisa ayaa kula soo xiriiri doona sidii uu kuu siin lahaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jadwalka maalinlaha ah iyo hawlaha barashada.

Waxaad sidoo kale aad gali kartaaa Shabakadayada Barashada Guryaha ee PPS (PPS At-Home Learning Website), oo loogu taloglay inay qoysaska siiyaan waxbarasho ku haboon casharada fasalka ay ku jiraan inay guryaha ku qaataan ka dibna ay dhammeystiraan shaqadii ay macallinku u diray inay qabtaan.

*Fasaladda 6-12:*
Macallimiinta iyo fasaladu waxay si foog arag ah ugu kulmi doonaan Google Meet ama Zoom inta lagu gudo jiro si joogta ah jadwalka waqtiga fasalada. Macallinka ardaygaaga ayaa kula soo xiriiri doonaa inuu ku siiyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jadwalka maalinlaha ah iyo hawlaha barashada. Qorshahayagu wuxuu yahay inaan sii wadno jadwalkii ay ardaydu ku qaadan jireen fasaladooda oo u bedelno muuqaal ahaan. Tusaale, ardaydu waxay tegi doonaan si wax uga bartaan xiisad kasta fasalkii ay tegi jireen, iyada oo muuqaal ah, isla markaana la mid ah markii ay fasaladooda dugsiga joogeen oo kale.

***

**Hawlaha Manhajka Dheeraadka ah**

Dhammaan hawlaha manhajka dheeraadka ah si ku meel gaar ah ayaan u hakinay kuwaasi oo ay ka mid yihiin ciyaaraha iyo bandhigyada farshaxanka inta lagu jiro waqtigani. Tani waxaa ka mid ah tartanada u dhexeeya dugsiyada ee PIL iyada oo hal dugsi si ku meel gaar ah u xidhan yahay oo waxbarashadii ay ardaydu ku qaadanayaan guryaha halka dugsi kalena ay ardaydiisu wali waxbarashadoodii dugsiga dhexdiisa ku qaadanayaan.

***

**Addeegyada Lagama Maarmaanka ah**

Waxaanu mudnaanta siineynaa helitaanka sidii loo heli lahaa addeegyada lagama maarmaanka ah inta lagu gudo jiro waxbarashada guryaha lagu qaadanayo. Waxaana ka mid ah addeegyada cuntada dugsiyada laga bixiyo, xarumaha caafimaadka ee ku yaala dugsiyadeena, xarumaha waalidiinta dhallinyarada ah, iyo taageerada teknooljiyada ee ardayda la siiyo.

*Cuntada*
Quraacda iyo qadadda waxaa ardayda waxbarashada ku qaadanaya guryaha sida ku meel gaarka ah waxay ka soo qaadan kartaa dugsiga. Macluumaad gaarka ee dugsiga, oo ay ka mid yihiin waqtiyada cuntada dugsiga laga qaadanayo iyo goobaha, waxaa idinla wadaagi doona dugsigiina.

*Teknooliga*
Sanadkani ardayda waxaa la siiyey **PPS Chromebook** kuwaasi oo qeyb ka ahaa Dadaaladayadii Chromebook Guriga U Qaado(1:1 Chromebook Take Home Initiative). Haddii arday wali u baahan yahay qalab, fadlan waxaad la xiriirtaan dugsigiina sidii uu ardaygaaga u siin lahaa mid.

Intaas waxaa dheer, **taageerada farsamo ee PPS** waxay noqon doontaa mid diyaar u ah qoysaska iyo ardayda inta lagu gudo jiro waqtigani.  Haddii aad u baahan tahay wax waxaad la xiriirta xafiiska gargaarka, iyada oo aad u diri karto email halkan support@pps.net ama aad wici karto khadka gargaarka ee telefoonkiisu yahay 503-916-3375.

*Xarumaha Caafimaadka*
Xarumaheena caafimaadku waa ay furnaan doonaa. Arday kasta oo ah fasalada K-12 kaasi oo ku nool ama wax ka barta dugsiyada PPS.  Fadlan waxaad booqataa shabakada degmada Multnomah wixii macluumaad dheeraad ah, oo ay ka mid tahay goobaha iyo saacadaha ay shaqeynayaan.

***

Waxaan maanka ku haynaa saameynta weyn ay yeelaneyso marka aynu ka guurno waxbarashadii fasalada dugsiga lagu qaadanayey ee loo guuro in ay ardaydu waxbarashada guryaha ku qaataan, fadlan waxaad ogaataa waxaan jecelnahay intii suurtagal ah inay ardaydeenu ay waxbarashadoodii ku qaataan dugsiyada, waqti ku dhow labo sanno oo cilmi baarisi waxay sheegaysaa inay dugsiyadu yihiin meelaha ugu wanaagsan in la joogo si waxbarashada loogu qaato, bulsho ahaan, maskax ahaan,jir ahaan, iyo shucuur ahaan. Sidaas darteed, meeshii aanan u heli karin shaqaale ku filan oo ku sii wado waxbarashada fasalada oo jawi nabadgelyo leh, waan in aan meel marinaa inaan si ku meel gaar ah ardayda waxbarashadoodii guryaha ugu siino ilaa aan dib ka furi karno

Waxaan bulshadeena uga mahadcelineynaa dulqaadkooda inta aan ka baxayno waqtiyadani adag. Haddii aad haysaan wax su'aalo ah, faalooyin ama walaac ah, fadlan waxaad nagala soo xiriirtaan Aynu Wada Hadalno. Fadlan waxaad doorataa(Waxbarshada Fogaan Araga ee Ku Meel Gaarka ah) "Temporary Distance Learning," iyada oo qof ka mid ah kooxdayadu uu kula soo xiriiri doono.

**Dugsiyada Dadweynaha Portland**